

Magaalada Saan Dhiyeego

HAGAHA ILAALINTA KIRAYSTAH

Julaay 2023



SAN DIEGO
HOUSING
COMMISSION

The City of
SAN DIEGO

TUSMO

<i>Tusmo</i>	<i>Error! Bookmark not defined.</i>
Hagaha Ilaalinta Xuquuqaha Kiraystaha Guriga Dagganaanshaha ee Magaalada Saan Dhiyeego	2
Hordhac	2
Ogaysiis Ka-Ilaashanaan Mas'uuliyadeed	2
Kiraystayaasha Kaalifoorniya: Hagaha Xuquuqaha iyo Mas'uuliyadaha Kiroolayaasha Guriyaha	
Dagganaanshaha iyo Kireeyayaasha	2
Sharciga Ilaalinta Xuquuqaha Kiraystaha Guriga Dagganaanshaha ee Magaalada Saan Dhiyeego	2
• <input type="checkbox"/> Ayuu khuseeyaa sharciga Magaaladu?.....,3	
<input type="checkbox"/> Sababta Caddaaladda ah ee Loo-baahanyahay ee Kirada Lagu-joojinayo	3
- Sabab caddaalad ah oo khalad dhacay ku-timid	3
- Sababta Caddaaladda ah ee Aan Khalad Dhacay Ku-iman..... <i>Error! Bookmark not defined.</i>	
<input type="checkbox"/> Shuruudda Ogaysiisnta	4
<input type="checkbox"/> Caawinta Meel Kale u Raridda Kiraystaha – Guri Ka-saaridda Caddaaladda ah ee aan Khalad ku-iman	6
<input type="checkbox"/> Shuruudaha Dheeraadka ah.....,6	
- Guriga dagganaanshaha ee kirada ah ee kiro ama liis loo-soo-bandhigi doono shan sano gudahood.....,6	
<input type="checkbox"/> Heshiisyada Kula-wareegid libsasho	6
<input type="checkbox"/> Aangoosiga oo La-mamnuucay	7
<input type="checkbox"/> Sharci-ilaalinta iyo Tallaabooyinka Xalka ah	8
Xogta Kiraystayaasha	8
<input type="checkbox"/> Xogta Sharciga ee Bulshada.....	8
<input type="checkbox"/> Xog-dheeraad ah oo Bulsheed	10
Lifaaq A: Macnaynta Ereyada	11
Lifaaq B: Xogta Isha Dakhliga	12
<input type="checkbox"/> Sharciga Maamulka Magaalada Saan Dhiyeego wuxuu mamnuucayaa takooridda ku-salaysan Isha Dakhliga ee Kiraystaha	12
<input type="checkbox"/> Warsidayasha Ururka Gargaarka Shariyeed ee Saan Dhiyeego	12
<input type="checkbox"/> Shabakadda Takooridda Guriga Dagganaanshaha ee Ururka Gargaarka Shariyeed ee Saan Dhiyeego.....,12	
Lifaaq C: Xogta Guriga Daggaanshaha ee Caddaaladda Ku-salaysan	13
<input type="checkbox"/> Sharciga Dadka Maraykanka ee Naafada ah (ADA)	13
<input type="checkbox"/> Waaxda Xuquuqaha Rayadka ee Kaalifoorniya – Takooridda Guriyaynta	13
<input type="checkbox"/> Xarunta Ururka Taageerada Bulshada ee Guriyaynta Caddaaladda Ku-salaysan ee Saan Dhiyeego	12
<input type="checkbox"/> Isbahaysiga Guriyaynta Caddaaladda Ku-salaysan ee Goboleed ee Saan Dhiyeego (SDRAFFH).....,13	
<input type="checkbox"/> Waxaada Guriyaynta iyo Horumarinta Magaalooyinka ee Maraykanka, Shabakadda iyo Buugga	
Fursadda Siman ee Guriyaynta Caddaaladda ah	13
<input type="checkbox"/> Waaxda Guriyaynta iyo Horumarinta Magaalooyinka ee Maraykanka iyo Shuruuca La-Xidhiidha	13

HAGAHA ILAALINTA KIRAYSTAHAD MAGAALADA SAAN DHIYEEGO (SAN DIEGO)

Hordhac

Magaalada Saan Dhiyeege waxay ilaalin u samaysaa kiroolayaasha dhibaatada guri kasaaridda lakulma. Waxaa mararka qaarkood dhici karta oo ilaalinadan kamid ah in kiraystaha guriji uu dagganaa laga-saaray loogu-gargaaro in meel kale la-dajivo. Ilaalinada xooggan ee loo-samaynayo kiroolayaasha gurayaha dagganaanshaha waxaa loogutagalay si looga-hortago si looga hortago guri-laawanimada iyo si guriyaynta iyo xasilloonida xaafadda. Sharciga magaaladu waa mid ilaalinadan xambaarsan.

Sharciga Magaaladu wuxuu Golaha (Koomiishinka) Guriyaynta ee Saan Dhiyeege (SDHC) farayaa in uu diyaariyo Hage Ilaalint Kirayste oo uu ka-dibna shabakaddiisa saaro si uu helitaanka hagahaasi fududeeyo. Hagahan waxaad ka heli karatan shabakadda www.sdhc.org/tenantprotections. Hagahan wuxuu bixinayaa xog waxbarasho iyo khayraad oo loogu-gargaaray koroolayaasha guriyaha dagganaanshaha si ay uu fahmaan xuquuqdooda hoos yimaada Sharciga Magaalada (City) iyo Gobolka (State). Hagaha waxa logu-tagalay xog-bixin kaliya. **Hagahan Ilaalinta Kiraysatuuhu talo sharciyeed ama mid jijo toona ma-bixinayo. Markaa, kiroolayaasha guryaha dagganaanshaha iyo kireyayaashu waa inay la-tashadaan wakiiladooda sharciyeed ama la-taliyayaashooda.** Waxaa jira kooxaaha uu dooda kiroolayaasha, hay'adaha caawimaadda sharciyeed iyo uruurrada kireyayaasha kuwaas oo bixin kara hagitaan dheeraad ah. Si aad xog dheeraad u heshid, fadlan eeg qaybta "Khayraadka" ee hagahan.

SDHC (Golaha Guriyaynta ee Saan Dhiyeege) ayaa hagahan u diyaariyay qaab ay akhristayaasha ugu-badan ee la-awoodi karo ay ugu-fahmaan, iyada oo lagu-soo-jeedinayo xogta saxda ah ee ku-saabsan ilaalinada ay heli karaan kiroolayaasha guryaha dagganaanshaha. Akhristayaashu si ay u helaan faah-faahinada gaarka ah shuruucda Magaalada (City) ama Gobolka (State), waa inay akhristaan awaaamiirta gaarka ee Magaalada (City), shuruucda Gobolka (State) iyo/ama go'aanada dhaqangalka ee maxkamadeed ee shuruucdan saamayn kara.

Hagahan kolba sida loogu-baahado ayaa dib-u-hagaajin loogu-samayn doonaa.

Hagahan Ilaalinta Kiraystaha waxaa isticmaali kara kirayayaasha si ay ugaga soo-baxaan shuruudaha ogaysiinta ee ku-dhex-jira qaybta 98.0705(b) ee Amarka Ilaalinta Kiroolayaasha Guryaha Dagganaanshaha ee Magaalada Saan Dhiyeege (San Diego).

Disclaimer (Ogaysiis Ka-Ilaashanaan Mas'uuliyyadeed)

HAGAHAN KIRAYSTAHAD WAXAA LOO-DIYAARIYAY SI KIROOLAYAASHA IYO KIREYAYAASHA LOOGA-CAAWIYO SOO-JEEDINTA IYO XUQUUQAHAD IYO WAJIBAADYADA DHINACYADA TAAS OO DABA-SOCOTA SOO-BIXITAANKA AMARKA LAMBARKIISU YAHAY 0-21647. WAXAA MUHIIM AH IN LA-OGAADO IN AY DHICI KARTO IN SHAY HAGAHA ILAALINTA KIRAYSTAHAD LAGU-DHEX-SHEEGAY UU U MUUQDO IN UU KA-DUWANYAHAY AMA KA-BADDALANYAHAY LUUQADDA DHABTA AH EE AMARKA (ORDINANCE), KAS OO AAN SHARCIYAN LA-OGGOLAYN, MARKAA LUUQADDA AMA ODHAAHDA DHABTA AH EE AMARKA (ORDINANCE) AYAA MARWALBA MUDNAANTA YEELANAYSA.

Kiroolayaasha Kaalifoorniya (California): Hage Tilmaamaya Xuquuqaha iyo Mas'uuliyyadaha Kiroolayaasha iyo Kireyayaasha

Gobolka (State) Kaalifoorniya wuxuu soo-saaray hage la-yidhaahdo "Kiroolayaasha Kaalifoorniya" (California Tenants) kaas oo ah Hage tilmaamaya Xuquuqaha iyo Mas'uuliyyadaha Kiroolayaasha iyo Kireyayaasha guryaha dagganaanshaha. Wuxuu hagihu xambaarsanyahay faah-faahinada lagama-maarmaanka ah ee ku-saabsan ilaalinada heer gobol (state) ee la-siinayo kiroolayaasha guryaha dagganaanshaha, waxaana ku-jira xog muhiim ah oo ku-saabsan xuquuqaha ay kiroolayaashu u leeyihiin in guryaha dagganaanshaha ee ay kiraystan si bilaa buuq ah ugu noolaan karaan. Waxaa hagaha gobolka (state) laga-heli karaa shabakadda <https://www.courts.ca.gov/documents/California-Tenants-Guide.pdf>. Hagaha Kiraystaha ee Magaalada Saan Dhiyeege waa il-xogeed oo ay heli karaan kiraystayaasha guryaha dagganaanshaha ee ku-dhex-nool Magaalada Saan Dhiyeege; hase-yeshe, hagahan ilaalinta kiraystaha ee magaaladu ma'aha mid baddalaya ama meesha ka-saaraya baahida ama mas'uuliyyadda in la-ogaado loo-baahanyahay ee kiraystayaasha guryaha dagganaanshaha ee hagaha gobolka (state) iyo ilaha kale ee xogta oo ay ku-jiri karto xogta ku-saabsan xuquuqaha kiraystayaasha.

Sharciga (Amarka) Ilaalinda Kiroolayaasha Guryaha Dagganaanshaha ee Magaalada Saan Dhiyeego

Firka Amarka Ilaalinda Kiroolayaasha Guryaha Dagganaanshaha ee Magaalada Saan Dhiyeege waxaa soo-jeediyyay Madaxwaynaha Golaha Magaalada Sean Elo-Rivera iyo Duqa Magaalada Todd Gloriya. Golaha Magaalada Saan Dhiyeege wuxuu amarka (Lambarka O-21647) ansixiyay markay taariikhdu ahayd May 16, 2023. Duqa Magaalada Saan Dhiyeege wuxuu amarkaasi la-ansixiyay uu saxeexiisa saaray markay taariikhdu ahayd May 25, 2023. Sharcigan Magaaladu wuxuu dhaqangalay June 24, 2023. Imika wuxuu yahay qaybaha Xeerka Magaalada ee uu tirsigoodu yahay 98.0701 illaa 98.0709.

Sida uu sharcigani dhigayo, Magaaladu waxay mas'uul ka-tahay dabagliida amarkaasi (sharcigaasi), waxaana mas'uuliyyaddaasi Magaalada kamid ah ilaalintisa iyo soo-saarista siyaasadeed.

Golaha Guriyaynta ee Saan Dhiyeege (SDHC) wuxuu mas'uul ka-yahay abuuridda Hagaha Ilaalinta Kiraystaha, in uu Magaalada warbixino ugudbiyao, iyo ururinta digniinahaha (ogaysiisyada) guri ka-saaridda ee kireyayaasha iyo ku-xereynta digniinta ee khadka loo-yaqaano Diiwaanka Digniinta Guri-ka-saaridda ee Magaalada Saan Dhiyeege.

- **Ayuu khuseeyaa sharciga Magaaladu?**

Amarka (Sharciga) Ilaalinada Kiroolayaasha Guryaha Dagganaanshuu wuxuu dhaqangal ku-yahay dadka guryaha la-dago kiraysta iyo kireeyayaasha ku-nool Magaalada Saan Dhiyeego. Waxaa tan ku-dhex-jira oo kamid ah kiroolayaasha hela caawimaadda Xulashada Foojarka Guriyaynta ee federaalka ee Qaybta 8.

Sharciga magaaladu wuxuu sheegayaa in shuruudihiisu ayna dhaqangal **ku-noqonayn** noocyoo gaar ah oo kamid ah guryaha Magaalada ka-jira. Waxaa kuwaas uusan dhaqangalka ku-noqonayn kamid ah:

- Hoteelada ku-meelgaadhka ah/kuwa dal-xiisasyaasha
- Guryaha muddada gaaban la-dagganaanayo
- Kuwa xadaynta sharcieed lagu-sameeyay, ama dukumeentiyada kale bixinaya guriyaynta qimaha jaban ee la-awoodi karo
- Guriyaynta loo-sameeyay heshiis taakuulayn siinaya qoysaska uu dakhligoodu aad u hooseeyo (illaa boqolkiiba 50 Dakhliga Dhedhexaadka ee Aagga Saan Dhiyeego [AMI], kuwa dakhliga yar (illaa boqolkiiba 80 Dakhliga Dhedhexaadka ee Aagga Saan Dhiyeego [AMI] ama kuwa dakhliga dhedhexaadka (illaa 120 Dakhliga Dhedhexaadka ee Aagga Saan Dhiyeego [AMI]. Hase-yeeshe, sida kor lagu-soo-sheegay, sharcigu wuxuu dhaqangalk ku-noqonayaa guryaha hela Xulashada Foojarka Guriyaynta ee Qaybta 8.
- Guryaha meel-ka-meel u guura (Mobilehomes) ee uu Sharciga Kaalifoorniya ee Guryaha Dagganaanshaha ee Meel-ka-Meel u Guura uu dhaqangalka ku-yahay.
- Guriyaynta ka-dhex-jirta cusbitaal aan macaash ku-salaysnayn, goobaha diimaha, goobaha laga-bixiyo daryeelka muddada dheer soconya, goobaha dagganaanshaha ee dadka waayeelka ah lagu-daryeelo ee shartiga haysta, maadaama ay kuwaasi ku-dhex-qeexanyihiin sharciga gobolka (state), ama guriyaynta ku-meelgaadhka ah ee aan macaashka ku-salaysnayn, kaas oo ah sida amarka (sharciga) ku-qeesan.
- Guryaha jiifka ee ay mulkiyadda iyo hawlgalintooda leeyihiin mac'hadyada waxbarashada (dugsiyada xannaanada carruurta illaa fasalka 12-aad iyo/ama waxbarashada sare).
- Guryaha la-dago ee kirada ah ee ay kireeyaha iyo kiraystuhu ay wadaagaan qolka qubayska ama jikada (goobta ah dagganaanshaha rasmiga ah ee kireeyaha).
- Goobta dagganaanshaha ee halka qoys ee kireyaha u goobta dagganaanshaha ee rasmiga ah.
- Guri is-haysta oo ka-kooban laba qaybood oo kala-soocan oo la-daggo oo uu mid kamid ahi ay tahay goobta dagganaanshaha rasmiga ah ee kireyaha.
- Guri shati guri dagganaansho helay 15 sano ee la-soo-dhaafay (oo AYNA KU-JIRIN guryaha meel-ka-meel u guura).
- Guryaha kirada ah ee la daggan yahay, oo ay ku jiraan guryaha meel-ka-meel uguura, kuwaas oo kabaxsan mulkiilenimada guri-kasta oo kale haddii uusan mulkiiluhu ahayn qaybaha kale ku-dhex-qoran Amarka (Sharciga) Ilaalinada Kiraystaha ee Guriga Dagganaanshaha IYO kiraystayaasha ogaysiis qoraal ah loo-siiyay hab waafaqsan foomka amarka (sharciga).

Sharciga Magaaladu waxaa kale oo uusan dhaqangal ku-noqonayn guryaha la-dago ee ku-yaalla meelaha aan la-wadaagin ee ka-tirsan Kaawuntiga (county) Saan Dhiyeego ama magaaloooyinka kale ee Kaawuntiga Saan Dhiyeego.

- **Sababta Caddaaladda ah ee Loo-baahanyahay ee Kirada Lagu-joojinayn**

Amarka (sharciga) Ilaalinada Kiraystaha Guriga Dagganaanshaha kireyaha uma oggolaanayo in uu kiraystaha guriga ka-saaro haddii ayna jirin "sabab" caddaalad ah oo keenaysa ka-saaridda guriga. Shariga Magaaladu wuxuu qeexayaa laba nooc oo "sabab caddaalad" ah noqon kara; waxayna kala-yihiin sida hoos ku-qoran:

- **Sababta Caddaaladda ah ee ka-imanaysa khalad la-sameeyay**

Kireyuhu isaga oo cuskanaya khalad dhacay wuxuu heshiiska kirada sabab caddaalad ah ku-joojin karaa haddii:

- Kiraystuhu kirada iska-bixin ama uusan kirada iska-bixinayn.
- Kiraystuhu ku-xadgudbo qodobbada heshiiska kirada.
- Kiraystuhu qaxar (dhibaatayn) sameeyo ama uu oggolaado in la-sameeyo, taas oo ah sida ku-dhex-qeexan sharciga gobolka (state).
- Kiraystuhu sababo burbur wayn oo guriga (hantida) soo-gaadha, kaas oo loogu-yeedho wax-bi'snimo oo ah sida uu sharcigu qeexayo.
- Kiraystuhu diido in uu heshiiska kirada sii dheeereeyo ama dib-u-cusboonaysiin ku-sameeyo muddo la-mid ah heshiiskii hore iyo qodobbo heshiis oo si hore aad ugu-eg.
- Kiraystuhu guriga laga-kireeyay iyo goobaha wada-jirka ah uu fal-dambiyeed ku-dhex-sameeyo.
- Kiraystuhu ku-hanjabo in uu fal-dambiyeed gaysanayo, kaas oo sida uu qeexayo sharicga gobolku (state).
- Kiraystaha oo heshiiska kirada ku-xadgudbaya guriga uu cid kale ka-sii-kireeyo.
- Kiraystuhu uu kireyaha u diido in uu guriga u soo-dhex-galo hab sharciga Gobolka (State) waafaqsan.
- Kiraystuhu guriga u adeegsado ujeeddo sharci-darro ah.
- Kiraystuhu yahay wakiilka (agent) ama shaqaalaha kireyaha oo shaqadaasi laga-joojiyey ama laga-saaray, ka-dibna uu guriga ka-bixi-waayo ka-dib marka shaqada laga-saaray.

- Kiraystuhu uu guriga ku-soo-wareejin waayo ka-dib marka uu kiraystuhu uu kireyaha siiyo ogaysiiska qoraalka ah ee ku-muujinayo in uu doonayo in uu guriga ka-baxo.

Sabab caddaalad ah oo khalad dhacay ku-timid

Kireyuhu wuxuu heshiiska kirada u joojin karaa Sabab Caddaalad ah oo aan Khalad Dhacay ku-xidhnayn haddii:

- Kiraystuhu doonayo in uu guriga la-wareego si uu naftirkisu u dago, si uu dajiyu lammaanihiisa, qof uu xidhiidh soke la-leeyahay (qaabka lammaanaha oo kale), ilmihiisa, ilmo uu awoow ama ayey u yahay, waalidkiisa ama awoogiis ama ayeydiis.
 - Heshiisyada kirada ee la-yeeshay wixii ka-dambeeyay June 24, 2023: Waxay tani dhaqangal ku-noqonaysaa haddii uu kiraystuhu qoraal ahaan ku-oggolaado in uu heshiiska kirada joojiyo ama haddii uu heshiiska kiradu uu kireeyaha si cad ugu-oggolaanayo in uu sababtan heshiiska kirada ku-joojiyo.
 - Heshiisyada kirada ee la-yeeshay wixii ka-horeeyay June 24, 2023: Waxaa heshiis cusub oo kiro, heshiis kiro oo dib-loo-cusboonaysiyya ama heshiis kiro oo muddo kooban ah lagu-soo-dari karaa qodob kireyaha u oggolaanaya in uu guriga uu kireeyay la-wareego si uu naftirkisu u dago, si uu dajiyu lammaanihiisa, qof uu xidhiidh soke la-leeyahay (qaabka lammaanaha oo kale), ilmihiisa, ilmo uu awoow ama ayey u yahay, waalidkiisa ama awoogiis ama ayeydiis. Waxaa qodobkan cusub loo-arki doonaa in uu “aad ugu-egyahay” qaybta sharciga Magaalada ee qeexaysa “Sababta Caddaaladda ah” ee ah in uu kiraystuhu diiday in uu heshiiska kirada ku-sameeyo sii dheereeyn ama dib-u-cusboonaysiin ku-sameeyo iyada oo ay “qodobbada aad ugu-egyihiin” heshiiskii hore.
- Kireyuhu doonayo in uu guriga la-wareego si uu guriga suuqa ugaga saaro (kirayntiisa joojiyo).
- Kireyuhu doonayo in uu guriga la-wareego si uu u fuliyo:
 - Amar maxkamadeed ama amar ka-soo-baxay wakaalad kale oo dawladeed oo u baahan in uu gurigu faaruuq noqdo ugu-yaraan muddo 30 maalmood ah.
 - Amar maxkamadeed ama amar ka-soo-baxay wakaalad kale oo dawladeed oo sheegaya in guriga laga-baxo.
 - Amar (sharcii) oo maamulka goobtaasi ka-soo-baxay oo doonaya in guriga laga-baxo.
 - ❖ Kiraystuhu xaq uma yeema yeelanayo in iyada oo la-cuskanayo Sharciga Ilaalinada Kiraystaha Guriga Dagganaanshaha meel kale la-dajiyu haddii ay maxkamadi ama wakaalad dawli ah ay go'aamiso in dhibaatada dhinaca guriga ka-dhacday ay tahay khalad ka-yimid dhinaca kiraystaha.
- Kireyuhu doonayo in uu guriga la-wareego si uu guriga u dumiyu ama uu qaabkiisa wax-kabbadalid wayn ugu-sameeyo. Marka ay xaaladaha noocan oo kale ahi jiraan, waxaa kireyaha looga-baahanyahay:
 - In guriga la-dagganyahay uu ku soo-dhajiyo codsiga uu xeraystay ee uu ku-dalbaday in oggolaanshaha loo-baahanyahay la-siiyo, waana uu codsigaasi soo-dhajiyo muddo saddex maalmood gudahood ah ka-dib marku uu xeraysto.
 - In uu helo oggolaanshaha loo-baahanyahay ee duminta guriga ama fulinta wax-kabbadalid wayn oo uu qaabka guriga ku-samaynayo.
 - In uu kiraystaha siiyo nuqulka (koobbiga) oggolaanshaha loo-baahanyahay ee la-siiyay oo ay la-socoto digniinta joojinta heshiika kirada oo qoraal ah oo lagu-xaqiijiyay in been la-sheego lagala kulmi doono ganaax ama ciqaab. Waxaa khasab ah in digniintu (ogaysiisku) uu sheego sababta heshiiska kirada loo-joojinayo, nooca hawsha guriga laga-qabanayo iyo xadka ay hawshaasi gaadhsiisantahay, sababta aan hawshaasi si ammaan ah loogu-fulin karayn kiraystaha oo guriga dhex-daggan, iyo sababta ay hawshu u noqotay mid u baahan in uu kiraystuhu guriga ka-tago ugu-yaraan muddo 30 maalmood ah.

• Shuruudda Ogaysiisnta

- Waxaa Kireyaha looga-baahanyahay in uu kiraystaha siiyo ogaysiis qoraal ah oo uu Kiraystaha kula-socodsiinayo Amarka (Sharciga) Ilaalinada Kiraystaha Guriga Dagganaanshaha, kaas oo:
 - ay waynida xuruufta qoraalku tahay “12-point font” (fontiska 12-ka dhibcood)
 - u hoggaansan sharciga Gobolka (Xeerka Madaniga ee Kaalifoorniya, qaybtiisa 1632)
 - Sheegaya:

Sharciga Kaalifoorniya wuxuu xadайнayaan cadadka kirada lagu-kordhin karo. Si aad xog dheeraad ah u heshid, eeg Xeerka Madaniga ee Kaalifoorniya qaybtiisa 1974.12. Sharciga maamulka goobta ka-jirana wuxuu xeerinayaan in kireyaha looga-baahanyahay in uu digniinkasta oo uu bixinayo oo uu heshiiska kirada ku-joojinayo uu ku-muujijo sababta uu heshiiska u joojinayo. Xaaladaha qaarkood, haddii uu kiraystuhu qof waayeele ah yahay (da'diisu tahay 62 jir ama wixii ka-wayn) ama uu qof naafu ah yahay wuxuu xaq u yeelanayaan ilaalino dheeraad ah oo kirayste. Si aad xog dheeraad ah u heshid, eeg Cutubka 9-aad, Qodobka 7-aad, Qaybta 7-aad ee Xeerka Maamulka Magaalada Saan Dhiyeego (San Diego Municipal Code).

- in uu la-socdo hal nuqul oo ah Hagaha Ilaalinta Kiraystaha

- Heshiiyada kirada ee jiray wixii ka-horeeyay June 24, 2023: Waxaa kiraystaha toos loo-siinaya ogaysiis uu la-socco Hagaha Ilaalinta Kiraystaha ama 90-ka maalmood ee ka-dambeeya June 24, 2023 gudahood ayaan lifaaq dheeraad ah looga-dhigaya qormada heshiiska kirada.
 - Kiraystha cusub ama dib-u-cusboonaysiinta sameeyay wixii ka-dambeeyay June 24, 2023: Waxaa heshiiska kirada lagu-soo-darayaa ogaysiis uu la-socco Hagaha Ilaalinta Kiraystaha ama waxaa laga-dhigayaa ogaysiis uu saxeexay xilligii uu heshiiska kirada la-saxeexay iyada hal nuqul Kiraystaha la-siinayo.
- Marka uu Kireeyuhu Heshiiska Kirada Joojinayo
 - Sababta Caddaaladda ku-salaysan ee lagu-joojinayo ay tahay khalad la-sixi karo oo ah xad-gudub xeerka heshiiska kirada lagu-sameeyay:
 - Kireyuhu wuxuu kiraystaha siinaya ogaysiis qoraal ah oo sheegaya xad-gudubka la-sameeyay iyo fursadda sixitaanka loogu-samayn karo.
 - Haddii aan xad-gudubkaasi lagu-saxin muddada ogaysiiska lagu-dhex-sheegay, kiraystuhu wuxuu heshiiska kirada ku-joojin karaa digniin (ogaysiis) saddex maalmood ah oo uu kiraystuhu guriga kaga-baxayo.
 - Wuxuu Kireyuhu uu Golaha Guriyaynta ee Saan Dhiyeego (SDHC) ogaysiinaya sababta caddaaladda ku-salaysan ee uu khaladku keenay ee heshiiska kirada lagu-joojiyay.
 - ❖ Kireyuhu wuxuu ogaysiiska Golaha Guriyaynta ee Saan Dhiyeego (SDHC) siinaya muddo aan ka-badnayn saddex maalmood oo shaqo gudaheed ka-dib marka uu digniinta joojinta heshiiska uu Kiraystaha siiyo.
 - ❖ Ogaysiinta loo-baahanyahay in Golaha Guriyaynta ee Saan Dhiyeego (SDHC) la-siyo dhaqangal ma-noqonayo illaa 30 maalmood ka-dib marka uu Golaha Guriyaynta ee Saan Dhiyeego (SDHC) bilaabo Khadka Diiwaangalinta Ogaysiiska Guri-ka-saaridda ee Magaalada Saan Dhiyeego.
 - Sababta Caddaaladda ah ee Bilaa Khaladka
 - Kiraya ayaan Kiraystaha siinaya digniin (ogaysiis) qoraal ah:
 - ❖ Taas oo waynida xuruufta ay ku-qorantahay ayna ka-yarayn “12-point font” (foonti 12-dhibcood ah)
 - ❖ Wuxuuna digniinta siinaya 30 ama 60 maalmood ka-hor taariikhda ladamacsanyahay in heshiiska kirada la-joojiyo, taas oo lagu-salaynayo sharciga Gobolka (State) (Xeerka Madaniga ee Kaalifooriya 1946.1)
 - ❖ Sharraxaad ka-bixinaysa sababta heshiiska kirada loo-joojinayo.
 - ❖ Weeth muujinaysa xuquuqda uu Kiraystuhu u leeyahay in meel kale la-dajiy (lacag kiraystaha toos loo-siinayo ama lacagta kirada laga-daynayo)
 - Lacag toos loo-siinayo: Ogaysiisku wuxuu sheegi doonaa cadadka ee kiraystaha meel kale loogu-rarayo iyo in uu kireyuhu lacagtaasi bixin doono 15 maalmood gudahood oo laga-soo-tirinayo taariikhda ogaysiiska (digniinta) la-bixiyat.
 - Ka-daynta Lacagta Kirada: Ogaysiisku (digniintu) waxay sheegi doontaa cadadka lacagta kirada laga-dayaay iyo in ayna jirin wax kiro ah oo kiraystaha lagu-leeyahay bishii ugu-dambaysay ee kiraystenimada.
 - ❖ Weeth muujinaysa xuquuqda uu Kiraystuhu u leeyahay in loo-soo-jeediyoo in uu heshiiska kirada dib-u-cusboonaysiisto iyo in la-siyo 30 maalmood oo uu soo-jeedintaasi ku-oggolaanayo, waa haddii ka-dib markii gurigaasi dagganaanshaha markale kiro loo-soo-bandhigo.
 - Kiraystuhu si uu xuquuqdaasi ugaga-faa'iidysto waa in uu muddo 30 maalmood gudaheed ah uu Kireyaha ku-ogaysiyo si uu u joojiyo heshiiska kirada ee uu Kiraystuhu doonayo in uu helo soo-jeedin dib-u-cusboonaysiin heshiisi kiro.
 - Sidoo kale Kiraystuhu wuxuu Kireyaha siinaya ciwaankiisa boosta ama ciwaankiisa email-ka si uu Kireyuhu ugu-soo-diro in uu soo-jeedintaasi samaynta heshiiska kirada uu ugu-soo-diro, waxaa kale oo uu Kireyaha lasocodsii doonaa baddalidda uu ku-samaynayo ciwaankiisa boosta ama ciwaankiisa email-ka.
 - Kiruhu wuxuu Golaha Guriyaynta ee Saan Dhiyeego (SDHC) ogaysiinaya arrinta ku-salaysan sababta caddaaladda ku-salaysan ee aan khaladka ki-xidhnayn ee heshiiska kirada lagu-joojinayo.
 - ❖ Kireyuhu ka-dib marka uu Kiraystaha siiyo ogaysiiska joojinta heshiiska kirada waa in muddo aan ka-badnayn saddex maalmood oo shaqo gudahood uu arrintaasi ogaysiyo Golaha Guriyaynta ee Saan Dhiyeego (SDHC).
 - ❖ Ogaysiintan looga-baahanyahay dhaqangal ma-noqon doonto illaa 30 maalmood ka-dib marka ay SDHC samayso khadka online-ka ee Diiwaanka Ogaysiiska Guri Ka-saaridda ee Magaalada Saan Dhiyeego ee ay dadwyanaaha ogaysiiso in khadkaasi la-abuuray.

- **Caawinta Meel Kale u Raridda Kiraystaha – Guri Ka-saaridda Caddaaladda ah ee aan Khalad ku-iman**
 - Lacag Siinta Tooska ah
 - Cadad lacageed oo dhan kirada laba bilood oo ah iyada oo cadadka kirada halka bil uu noqon doonto lacagtii kirada ee dhaqangalka ahayd markii la-bixinayog ogaysiiska guri ka-saarista ee sababta caddaaladda ku-salaysan ee aan ku-xidhnayn khalad dhacay.
 - Lacagta tooska ah ee la-siinayo kiroolayaasha waayeeleka ah iyo kuwa naafada ah waxay noqonaysaa mid u dhiganta lacagta kirada ee saddex bilood iyada oo cadadka kirada halka bil uu noqon doonto lacagtii kirada ee dhaqangalka ahayd markii la-bixinayog ogaysiiska guri ka-saarista ee sababta caddaaladda ku-salaysan ee aan ku-xidhnayn khalad dhacay.
 - Haddii ay guri ku-noolyhiin dad ka-badan hal kireyste, Kiryuhu meeshii uu kireyste-walba si gaar ah lacag toos ah uga-siin lahaa wuxuu heli karaa in dhammaan kiraystayaasha heshiiska kirada ku-wada-qoran uu hal lacag si toos ah u siiyo.
 - Iska-daynta Kirada
 - Kireyuhu marka uu sabab caddaalad ah oo uusan ku-jirin khalad dhinaca kiraystaha kadacay kiraystaha kama-qaadayo lacagta kirada ah ee waqtigeedu taaganyahay ama lacagta kirada ee mustaqbalka ee uu kiraystaha lagu-yeelan doono muddada ay digniintu jirto iyo dhammaan hadhsan ee ay kiradu socoto.
 - Cadadka kirada la-iska-daynayo ee kiraystaha loo-dhaafayo waxay noqon doontaa mid u dhiganta lacagta sida tooska ah loo-bixinayo (laba ama saddex bilood oo kirada dhabta ah, taas oo ah sida kor lagu-soo-sheegay). Kiradan la-iska-daynayo waa baddal u noqonaysa lacagta sida tooska ah loo-bixin lahaa.
 - Lacagaha kaydka ah ee dammaanadda ah
 - Kiraystaha waxay wali mas'uuli ka-saarnaan doontaa in isaga oo xeerarka heshiiska ku-salaynaya uu Kiraystaha u celiyo haddii ay jirto wax lacag ah oo kayd ah oo dammaanad ahaan kiraystaha looga-dhigay. Caawimaadda loo-samaynayo guuritaanka kiraystaha arrintan kiraystaha looga-baahanyahay meesha kama-saarayso ama baddalkeeda ma-galayaso.
 - Caawimaadda Kale ee Guuritaanka
 - Caawimaadda guuritaanka ee uu dhigayo Sharciga Ilaalinda Kiraystaha Guriga Dagganaanshaha waxay noqonaysaa mid la-socota caasimaad-kasta oo kale oo raritaan oo uu dhigayo sharciga federaalka, kan gobolka (state) ama sharci kale oo maamulka goobtaasi ka-jira.
 - Kiraystaha oo Guriga Ka-bixi-waaya
 - Haddii uu Kiraystuhu taariikhda lagu-muujiyyat ogaysiiska (digniinta) guri-ka-saaridda sababta caddaaladda ah ku-timid oo aan ahayn khalad dhinaca kiraystaha ka-dhacay uu guriga laga kiray kaga-bixi-waayo, Kireyuhu wuxuu soo-ceshan karaa cadadka dhabta ah ee caawinta guuritaanka ee uu Kiraystaha horay u siiyay. Wuxuu lacagtan ku-soo-ceeshan karaa tallaabada sharchiyeed ee uu qaadayo ee uu dib-ugula-wareegi doono guriya uu kireeyay oo ay lacagtaasi noqon doonto khasaare soo-gaadhay.
- **Shuruudaha Dheeraadka ah**
 - Guriga dagganaanshaha ee kirada ah ee kiro ama liis loo-soo-bandhigi doono shan sano gudahood
 - Kireyaha aaya marka hore qoraalahaan kiraynta guriga ugu-soo-bandhigaya kiraystaha barakacy ee ku-barakacay sabab caddaalad (macquul ah) oo aan ahayn khalad dhiniciisa kadacay, waxayna sidaasdhacaysaa haddii uu Kiraystuhu:
 - Kireyaha la-socodsiiyay in uu doonayo in uu helo soo-bandhigid uu kiraystenimada dib-ugu-cusboonaysiisto; iyo
 - Kireyaha siiyay ciwaankiisa boosta ama ciwaankiisa email-ka.
 - Kireyuhu wuxuu xaq u leeyahay in isaga oo hababka warshadaha laga-oggolyahay adeegsanaya uu Kiraystaha baadhitaan ku-sameeyo.
 - Kireyuhu qormadiisa soo-bandhigidda ee kiraystanimada cusub ku soo gudbinayaa shuruudaha ugu-hooseeya ee baadhitaanka.
 - Kiraystuhu ka-dib marka ay gaadho soo-bandhigidda ama soo-jeedinta kirada wuxuu yeelan doonaa muddo 30 maalmood ah oo laga-soo-tirinayo taariikhda uu soo-bandhigiddaasi guddoomay si uu ugaga jawaabo in uu soo-jeedintaasi kirada ee loo-sameeyay uu oggolyahay iyo in kale.
 - Kireyaha oo si adag ugu-hoggaaansanaan-waaya shuruudaha ay dhigayso qaybtaasi gaarka ah ee Sharciga Ilaalinada Kiraystaha Guriga Dagganaanshaha (Xeerka Maamulka Magaalada Saan Dhiyeego 98.0706) wuxuu macnaheedu noqon doonaa in ogaysiis (digniin) kasta oo kiraystenimada lagu-joojinayo ee ay dhigayso qaybtaasi sharciga Magaaladu uusan wax qimo ah yeelan doonin.
 - **Heshiisyada Kula-wareegid Iibsasho**
Sharciga Ilaalinada Kiraystaha Guriga Dagganaanshaha waxaa ku-dhex-jira xeer-nidaameedyo lagu-kordhinayoo caddaaladnimada waan-waanta iyo heshiisyada iibashada. Qaybtan sharciga maamulka goobtaas ka-jira waxaa loogu-talagalay in lagu-xaqiijyo in kiraystayaasha heshiiyada iibashada galaya ay

xuquuqahooda gartaan iyo in laga-hortago in Kireyayaashu ayna galin heshiisyo la-xidhiidha xuquuqaha sharchiyeed iyo sixitaanada jira ee uu sharciga jira bixinayo.

- **Shaacin Qoraal ah oo La-samaynayo Ka-hor Intaan Iibsashada Loo-soo-bandhigin:** Kireyuhu ka-hor intuusan iibashada soo-jeedin, waxaa looga-baahanyahay in uu Kireysta kasta oo guriga daggan uu siyo shaacin qoraal ah oo ay ku-jiraan arrimaha hoos ku-qoran:
 - Odhaah muujinaysa in uu Kiraystuhu xaq u leeyahay inuuus galin heshiiska iibashada.
 - Odhaah muujinaysa in uu Kiraystuhu ka-hor intuusan heshiiska iibashada galin uu dooran karo in uu qareen sharchiyeed la-tashado.
 - Odhaah muujinaysa in Kireyuhu uusan tallaabo aargoosi ah ka-qaadi karayn Kiraystaha oo oggolaan waayay galitaan waan-waan ama heshiis iibasho.
 - Odhaah muujinaysa in dhammaan kiraystayaasha daggan ay diid karaan aqbalidda soo-jeedino iibasho oo mustaqbalka imanaya.
 - Kiraystayaashu (kiroolayaashu) waxay diidmadooda ku-muujinayaan ogaysiis qoraal ah oo ay Kireyaha siinayaan. Go'aanka diidmada oggolaanshaha soo-jeedinta iibashada ee Kiroolayaashu in waxay soconaysaa muddo lix bilood ah. Dhammaan kiraystayaasha gurigaasi daggan go'aankooda diidmada way ka-noqon karaan oo waxat qaadan karaan soo-bandhigidda iibashada ee mustaqbalka la-samayn doono iyaga oo ogaysiiska go'aankoodaasi Kireyaha qoraal ku-ogaysiinaya.
 - Odhaah muujinaysa in uu Kiraystuhu uqalmo caawimaadda guuritaanka iyo cadadka lacageed ee ay caawimaadda guuritaanka u baahantahay.
 - Dhammaan magacyada dadka loo-oggolyahay in ay wadahadal ka-yeeshaan soo-bandhigidda iibashada iyo galitaanka heshiiska iibashada iyaga oo Kireyaha matalaya.
 - Meel bannaan oo kirayste-kasta oo loo-diyaariyay si uu ugu-saxeeexo uguna qoro taariikhda uu Kireyuu uu Kiraystaha u shaaciay.
 - Meel bannaan oo uu Kireyuhu ku-saxeeexayo kuna qorayo taariikhda uu Kiraystaha u shaaciay.
- Waxaa Kireyaha looga-baahanyahay in uu Kirayste-kasta muddo saddex maalmood gudahood ah oo laga-soo-tirinayo taariikhda shaacinta la-fulyay uu ku-siyo nuqulka shaacinta lagu-sameeyay oo dhammaystiran.
- Waxaa Kireyaha looga-baahanyahay in uu muddo shan sano ah hayo koobbiga laga-diyaariyay mid-kasta oo foomka dhammaystiran.
- **Shuruudaha Heshiiska libashada:** Sharciga (Amarka) Ilaalinada Kiraystaha Guriga Dagganaanshahu wuxuu Kireyayaasha farayaan inay u hoggaansanaadaan shuruudo gaar ah oo iibashada ku-saabsan, waxaana kamid ah kuwa hoos ku-qoran:
 - Heshiiska iibashada qoraal ayaa lagu-diyaarinayaa.
 - Kireyuhu waa in uu Kiraystaha siyo hal nuqul oo heshiiska iibashada ka-dib marka uu Kiraystuhu uu heshiiskaasi iibashada saxeexo.
 - Heshiiska iibashada waxaa ku-dhex-jiraya weedho gaar ah oo ku-qoran xuruuf lamoobeyay oo uu waynidisu tahay ugu-yaraan 14-points font (font 14 dhiccood ah), kuwaas oo lagu-qorayo meel u dhaw booska loo-diyaariyay saxeexa Kiraystaha:
 - Adiga oo kiraystaha ah waxaad xaq u leedahay in aanad galin heshiiska iibashada.
 - Adiga oo kiraystaha ah waxaad xaq u leedahay in aad hab waafaqsan sharciga federaalka, kan gobolka (state) ama kan maamulka goobtaasi ka-jira aad ku-heshid caawimaadda guuritaanka, heshiis iibasho oo ka-yar cadadka caawimaadda guuritaanka oo aad xaq-u-leedahay wuxuu ku-xadgudbayaa Cutubka 9-aad, Qodobka 8-aad, Qaybta 7-aad ee Xeerka Maamulka Saan Dhiyeego, sidaas-awgeed dhaqangal ma-noqonayo.
 - Adiga oo kiraystaha ah ka-hor intaanad heshiiskan saxeexin waxaad dooran kartaa in aad qareen sharchiyeed la-tashatid.
 - Haddii luuqadda uu Kiraystuhu ku-galayo waan-waanta heshiiska iibashada ama kiraysashada ayna Af-Ingiiriis ahayn, waxaa Kireyaha looga-baahanyahay in uu Kiraystahaasi siyo nuqulka heshiiska iibashada oo ku-diyaarsan luuqadda Af-Ingiiriisiga **iyo** iyo nuqulka tarjumaad lagu-diyaariyay luuqadda uu kiraystuhu adeegsado. Kireyuhu labadan nuqul isku-hal mar ayuu kiraystaha siinayaa.
 - Heshiiska iibasho oo ka-yar cadadka lacagta caawimaadda guuritaanka ee uu kiraystuhu in la-siyo uu xaq u yeelanayo, marka laga-eego dhinaca sida uu dhigayo Sharciga Ilaalinada Kiraystaha Guriga Dagganaanshaha, wuxuu noqonayaa mid aan qiimo lahayn oo aan dhaqangal ahayn. Waxaa khasab ah in cadadka lacageed ee heshiiyada iibashado uu ka-badanyahay cadadka lacageed ee guuritaanka lagu-caawinayo.
 - Qodob-kasta oo ku-dhex-jira heshiiska iibashada, kirada (liis), qandaraas ama heshiis kale oo sheegaya in laga-noqday ama uu xadaynayo xuquuqaha kiraystaha ee lagu-caddeeyay Sharciga Ilaalinada Kiraystaha Guriga Dagganaanshaha wuxuu noqonayaa mid aan qiimo lahayn oo aan dhaqangalna noqonayn.
- **Aangoosiga oo La-mamnuucay**
Sharciga Ilaalinda Kiraystaha Guriga Dagganaanshaha wuxuu Kireyaha ka-mamnuucayaa in uu tallaabo aangoosi ah ka-qaado Kiraystayaasha ka-faa'iidaysanaya xuquuqahooda uu sharcigu siiyay.

- **Sharc-iilaalinta iyo Tallaabooyinka Xalka ah**
 - Magaaladu iyada oo adeegsanaysa mas'uuliyadda iyo awoodaha ay leedahay ay fulin kartaa qodobbada ku-dhex-jira Sharciga Ilaalinada Kiraystayaasha Guriga Dagganaanshaha. Waxaa kuwan lagu-dhex-muujiyay Cutubka 1-aad, Qodobka 2-aad ee Xeerka Maamulka Magaalda Saan Dhiyeego: [\[https://docs.sandiego.gov/municode/MuniCodeChapter01/Ch01Art02Division01.pdf\]](https://docs.sandiego.gov/municode/MuniCodeChapter01/Ch01Art02Division01.pdf)
 - Golaha Guriyantaa ee Saan Dhiyeego (SDHC) wax awood ah umalaha in uu fuliyo xeerarka Sharciga (Amarka) Ilaalinada Kiraysaha Guriga Dagganaanshaha.
 - Kiraystayaashu waxaa kale oo ay maxkamadda u soo-gudbisan karaan tallaabo sharchiyeed oo la-xidhiidha eedaymo ku-saabsan xad-gudubyoo uu Kireyuu ku-sameeyay Sharciga Ilaalinada Kiraystaha Guriga Dagganaanshaha.
 - Kiraystuhu wuxuu maxkamadda ka-codsan kartaa inay Kireyaha amar ku-siiso in uu fuliyo tallaabo looga-baahanyahay in uu qaado ama inay amar ku-siiso in uu joojiyo tallaabo aan looga-baahnayn in uu qaado (nafiska samaynta iyo nafiska joojinta).
 - Kiraystuhu wuxuu codsan karaa in Kireyaha magdhaw khasaare laga-siiyo eedaymaha uu ka-soo-jeediyay ee xad-gudubyada uu ku-sameeyay Sharciga Ilaalinada Kiraystaha Guriga Dagganaanshaha.
 - Kireyaha caawinta guuritaanka ee looga-baahanyahay aan kiraystaha siin wuxuu mas'uul ka-noqonayaa oo loo-qabsanayaa dacwad madani oo ah oo uu qiimaheedu gaadhsisanyahay illaa saddex laabka caawimaaddi guuritaanka ee looga-baahnnaa iyo khasaaraha dhabta ah ee dhinaca dhaqaalaha ee kiraystaha soo-gaadhay.
 - Haddii uu Kireystuhu isku-dayo in uu guriga kirada ee dagganaanshaha kula-wareego ahb ku-xadgudbaya Sharciga Ilaalinada Kiraystaha Guriga Dagganaanshaha, waxaa loo-qabsan doonaa oo lagu-soo-oogi doonaa dacwad madani ah oo ku-saabsan khaladka madaniga ah ee uu Kiraystaha ku-sameeyay ee ka-saaridda guriga wuxuuna qimaha lagu-soo-dacwayanayo uu noqonayaa mid aan ka-yarayn saddex laabka khasaaraha dhabta ah ee dhinaca dhaqaalaha ee uu kiraystaha u gaystay.
 - Tallaabada sharchiyeed ee dhix-maraysa Kiraystaha iyo Kireyaha ee aan ku-saabsanayn guri ka-saарid (xanibaha sharci-darrada ah), dhinaca dawadda ku-guurlaysta waxaa dhinaca laga-guulaystay looga-qaadaya kharashyada ka-baxay iyo ujrooyinka macquulka ah ee qareenka sharchiyeed.
 - Kiraystuhu marka uu iska-difaacayo tallaabada uu guriga dagganaanshaha ee kirada kagala-wareegayo, wuxuu soo-jeedin karaa xad-gudub-kasta ama u hoggaansanaan la'aan-kasta oo uu Kireyuu ku-sameeyay Sharciga Ilaalinada Kiraystaha Guriga Dagganaanshaha. Waxaa arrintan loogu-yeedhaa "difaaca wanaagsan" ee uu Kiraystaha iskaga badbaadinayo dacwadda uu Kireyuu ku-soo-oogay.
 - Dhammaan tallaabooyinka xalka ah (kuwa lagu-bogsanayo) ee ku-dhex-jira Sharciga Ilaalinada Kiraystaha Guriga Dagganaanshaha ayuu mid-walba ka kale u adeegsan karaa. Waxaa kale oo lala-adeegsan karaa tallaabooyinka kale ee xalka noqon kara ee ay shuruucda kale soo-jeediyaan.

Ilaha Xogta ee ay Kiraystayaashu Ka-faa'iidayasan karaan

- **Ilaha Xogta Sharchiyeed ee Bulshada**

Tani **ma'aha** ansixin ama tala-bixin uu Golaha Guriyayanta ee Saan Dhiyeego (SDHC) urur ama ururro-kasta oo gaar ah u samaynayso. Kiraystayaashu waa in ay gartaan oo ay doortaan caawimaad sharchiyeed ama wakiilkooda sharchiyeed. Waxaa ilaha xogta ee ay Kiraystayaashu ka-faa'iidayasan karaa hoos loogu-qoray iyada oo loo-dhigayo sida ay xarfahoodu u kala-horeeyaan.

 - **Hagaha Maxkamadaha Kaalifoorniya ee Iskaa-Isku-Gargaar (California Courts Self-Help Guide)** (waxaa ka-faa'iidayasan kara Kiraystayaasha iyo Kireyayaasha)
 - Ka-saарid (Eviction): <https://selfhelp.courts.ca.gov/eviction>
 - Ka-saарid iyo Guriyayn (Eviction & Housing): <https://selfhelp.courts.ca.gov/eviction-and-housing>
 - **Mashruuca Sharica ee Bulshada Galbeedka Kaalifoorniya (California Western Community Law Project)** Mashruuca Sharciga Bulshada (CLP) waa iskaashi dhix-maray Dugsiga Sharciga ee Galbeedka Kaalifoorniya iyo hay'ado badan. CLP wuxuu tala-bixin sharchiyeed siiyaa gudbina u sameeyaa dadka uu dakhligoodu yaryahay iyo kuwa saboolka ah ee xubnaha bulshada deegaanka ee Saan Dhiyeego, oo uu ku-jiro sharciga guriyayntu. CLP waxay dhammaan Magaalada Saan Dhiyeego ay ku-leedahay kiliiniigyo adeegyadooda ku-bixiyay hab ku-salaysan kolba sida loo kala-horyimaaddo.
619-780-7498
CLP@cwsl.edu
225 Cedar Street, 1st Floor, San Diego, CA 92101
Goobaha Kiliiniigyada iyo saacadaha la-heli karo waxaa laga-heli karaa shabakadda: <https://cwclp.org/>
 - **Ururka Gargaarka Sharchiyeed ee Saan Dhiyeego (Legal Aid Society of San Diego)**

Ururka Gargaarka Sharchiyeed ee Saan Dhiyeego (LASSD) waa sharchiyeed oo aan macaash loo-aasaasin oo adeeg sharchiyeed oo bilaa lacag ah u fidya dadka ku-nool Saan Dhiyeego ee uu dakhligoodu hooseeyo. LASSD wuxuu bixiyaa adeegyada guriyaynta, oo ay kamid yihii difaaca lagaga-hortagayo guri ka-saariista iyo caawinta arrimaha kaalmada guriyaynta, takooridda dhinaca guriyaynta, xuquuqaha kiraystaha, iyo takooridda dhinaca isha dakhliga. LASSD wuxuu fuliyaa shaqada Kiliniiga Adeegyada Loo-soo-doonata ee Difaaca Sharchiyeed ee Laga-hortagayo Guri Ka-saarista, waxayna ku-tallaa Hoolka Caddaaladda ee Maxkamadda (Hall of Justice Courthouse) ee Badhtamaha Saan Dhiyeego; waxayna adeegyadeeda u bixisaa qaabka ku-salaysan kolba sida loo-kala-horyimaaddo (ka ugu-horyimaadda ayaa marka hore loo-adeegaya).

(877) 534-2524 (1-877 LEGAL AID-TAAGEERADA SHARCIGA)

TTY: (800) 735-2929

Info@lassd.org

Xafiiska Koonfurta-Bari ee Saan Dhiyeego (Southeast San Diego Office): 110 S. Euclid Avenue, San Diego, CA 92114

Xafiiska Badhtamaha Saan Dhiyeego (Midtown San Diego Office): 1764 San Diego Avenue, Suite 100, San Diego, CA 92110

- **Killiniigya Adeegyada Sharciga (Legal Services Clinics)**

Caawimaadda killiniigyadan maxkamadda waxaa adeegga loo-bixiyay habka loo-yaqaano qofka ugu-horeeya ayaa adeegga ugu-horeeya helaya. Shaqaalahaa goobtan ka-shaqeeya waa kuwa karti u leh in ay macaamiisha u sharraxaan hab-raacyada iyo garaarka ay ka-siinayaan dhinaca diyaarinta foomamka.

▪ **Killiinigga "Unlawful Detainer" – Ururka Gargaarka Sharchiyeed ee Saan Dhiyeego (Legal Aid Society of San Diego)**

Maxkamadda Guud ee Kaawntiga Saan Dhiyeego, Hoolka Caddaaladda (San Diego County Superior Court, Hall of Justice)
330 W. Broadway, San Diego, CA 92101

Walk-in Hours: Isniinta - Jimcaha, marka laga-reebo marka ay maxkamaddu fasaxa tahay, 8:30 a.m (aroornimo). - 3:30 p.m. (galabnimo)

(877) 534-2524 (1-877 LEGAL AID)

▪ **Killiinigga Khilaafka Kireyaha-Kiraystaha (Landlord-Tenant Dispute Clinic)**

Maxkamadda Guud ee Kaawntiga Saan Dhiyeego, Hoolka Caddaaladda (San Diego County Superior Court, Hall of Justice)
330 W. Broadway, San Diego, CA 92101

Walk-in Hours: Isniinta- Jimcana, marka laga-reebo marka ay maxkamaddu fasaxa tahay, 8:30 a.m (aroornimo)- badhtamaha dharaarta

- **Xarunta Qaran ee Xallinta Khilaafka (National Conflict Resolution Center)**

Xarunta Qaran ee Xallinta Khilaafka (NCRC) waxaa loo-aqoonsanyahay inay heer caalami xagga hore kaga-jirto tilmaanta dhexdhexaadinta iyo xallinta khilaafka. Xaruntu waxay adeeg bilaa lacag ah siisa shakhsiyaadka ku-nool Magaalada Saan Dhiyeego, waxaana adeeggeeda kamid ah arrimaha iyo khilaafaadka ka-dhexeeya kireyaha iyo kiraystaha.

(619) 238-2400

info@ncrconline.com

530 B Street, Unit 1700, San Diego, CA 92101 (Main Office- Xafiiska Wayn)

- **Barnaamijka Sharci-yaqaanada Mutadawiciinta ah ee Saan Dhiyeego (San Diego Volunteer Lawyer Program)**

Barnaamijka Sharci-yaqaanada Mutadawiciinta ah ee Saan Dhiyeego (SDVLP) waa hay'ad si khaas ah loo-leeyahay, aan macaash loo-aasaasin oo adeeg bilaa lacag ah bixiya, waxayna adeeggaasi dadka u qalma, dakhligoodu hooseeyo, dakhligoodu hooseeyo, saboolka ah ee reer Saan Dhiyaago ah. SDVLP waxay adeegyo u fidisa macaamiisha uu dakhligoodu hooseeyo ee u baahan in laga-caawiyo baahiyada kala-duwan ee dhinaca guriyaynta iyo arrimaha ka-dhexeeya kireyaha – kiraystaha. SDVLP waxay fulisaa Barnaamijka Xuquuqaha Kiraystayaasha (Tenants' Rights Program), waxayna hawshaasi fulisaa iyada oo adeegsanaysa Killiniiggeeda Gog ee Adeegga Sharchiyeed ee Guri Ka-saarista (Remote Eviction Legal Clinic), waxayna hawsheeda qabataa arooryada Khamiista markay saacaddu tahay 9:30 a.m. (aroornimo). Codsadayaashu waxay codsigooda killiniiggen u soo-marin karaan dhinaca khadka telefoonka (619) 235-5656 x127 ama shabakadda internet-ka <https://sdvlp.org/trp-remote-legal-clinic/>.

(619) 235-5656 x127

info@sdvlp.org

707 Broadway, Suite 1400, San Diego, CA 92101

- **Maxkamadda Guud ee Kaalifoorniya, Kaawntiga Saan Dhiyeego (Superior Court of California, County of San Diego)**

"Unlawful Detainers": (619) 450-7275

Landlord/Tenant (Unlawful Detainer) Xogta waxaa laga-heli karaa:
<https://www.sdcourt.ca.gov/sdcourt/civil2/landlordtenant>

- **Jaamacadda Saan Dhiyeego Killiniigga Sharciga ee Dugsiga SharcigaDugsiga (University of San Diego School of Law Legal Clinic)**
Killiniigga sharciga ee Mashruuca Xuquuqaha Guriyaynta ee ku-yaalla Jaamacadda Saan Dhiyeego wuxuu u adeegaa shakhsiyadka uu dakhligoodu hooseeyo, waxayna diiradda saartaa bixinta waxbarashada, matalidda macaamiisha meesha fog iyo sida tooska ah si ay markaa ugaga caawiso xasillooni la'aanta ka-jirta dhinaca guriyaynta (oo ay ku-jirto guri la'aanta), guri ka-saarista, dammaanadda daynta, iyo halisaha ka-jirta dhinaca guriyaynta, sida karti-la'aanta ku-dhex-noolaanshaha iyo dhibaataynta.
(619) 260-7470

5998 Alcala Park, Barcelona 305, San Diego, CA 92110

- **Khayaadyaa Dheeraadka ah ee Bulshada (Additional Community Resources)**

- **2-1-1 San Diego (Saan Dhiyeego)**
211 Saan Dhiyeego waa hay'ad aan macaash loo-aasaasin oo maamulka hoose ee deegaanka ka-hawlgasha, waxayna ka-shaqaysaa fududaynta helitaanka adeegyada bulsheed, caafimaad, iyo mas'iiboyinka. 211 Saan Dhiyeego waxay bixisaa adeeg bilaa lacag ah oo 24 saacadoo ah, adeeg telefoon oo uu qarsoodinimadiisu ilaashanyahay iyo kayd macluumaad (database) oo la heli karo oo internet-ka (online).
Soo-garaac (Call) "2-1-1"
211help@211sandiego.org
Sanduuqa Boosta 420039, Saan Dhiyeego, CA 92142 (P.O. Box 420039, San Diego, CA 92142)
- **U doodayaasha La-awoodi karo ee Guriyaynta (Affordable Housing Advocates) (AHA)**
AHA waa hay'ad aan macaash loo-aasaasin oo Magaalada iyo Kaawintiiga Saan Dhiyeego ka-bixisa adeegga matalaadda sharchiyeed oo bilaa lacag ah, waxayna adeeggaasi bixisa iyada oo isticmaalaysa laba mashaariic, kuwaas oo kala ah: Mashruuca IMPACT iyo Mashruuca Xuquuqda Kiraystayaasha. Mashruuca IMPACT wuxuu matalaa oo uu doodaas si ay macaamiishu ugu-halgamaan xuquuqdooda guriyaynta iyaga oo adeegsanaya shuruucda u baahan qorshaynta, maalgalinta iyo horumarinta guriyaynta la-awoodi karo iyo bulshooyin isku-dheelitiran. Mashruuca Xuquuqaha Kiraystayaashuna wuxuu ka-shaqeeya arrimaha la-xidhiidha guriyaha kirada loogu-jiro iyo dhinaca u halgamidda guriyayn wanaagsan.
(619) 233-8441
(619) 233-8474 (Mashruuca IMPACT)
(619) 233-7263 (Mashruuca Xuquuqaha Kiraystayaasha)
admin@affordablehousingadvocates.org
427 C Street, Suite 304, San Diego, CA 92101
- **Waaxda Caddaaladda ee Kaalifoorniya (California Department of Justice) – Arrimaha Kireyaha - Kiraystaha**
<https://oag.ca.gov/consumers/general/landlord-tenant-issues>
- **Kiraystayaasha Kaalifoorniya – Hagaha Xuquuaha iyo Mas'uuliyadaha Kiraystayaasha Guryaha Dagganaanshaha iyo Kireyayaasha (Naqtin lagu-sameeyay January 2023) – WAXAA KU-JIRA SOO-KOOBIDDA XUQUUQAH A KIRAYSTAYAASHA SI AY U HELAAN DAGGANAASHO XASILLOON OO LAGU-RAAXAYSTO**
<https://www.courts.ca.gov/documents/California-Tenants-Guide.pdf>
- **CSA Kaawintiiga Saan Dhiyeego (CSA San Diego County)**
CSA ee Kaawintiiga Saan Dhiyeego waa hay'ad ansixin ka-haysata Waaxda Guriyaynta iyo Horumarinta Magaaloooyinka (HUD) ee Maraykanka oo aan macaash loo-aasaasin oo ka-shaqaysa dhinaca tala-bixinta guriyaynta. Hawsha ugu-horaysa ee CSA ee Kaawintiiga Saan Dhiyeego waa horumarinta caddaaladda bulshada iyo nabad-qabka dadwaynaha, waxayna fulinta hawsheedaasi u adeegsataa barnaamijyo, adeegyo iyo u dooddid ka-dhan ah dhammaan noociyada kala-duwan ee takooridda, oo ay ku-jirto u dooddida tirtiridda takooridda dhinaca guriyaynta si markaa loo-xaqijiyo helitaanka fursadda siman ee guriyaynta ee dhammaan shakhsiyadka. CSA waxay caawisaa shakhsiyadka qaba dhibaatooyinka dhinaca kirada iyo guriyaynta caddaaladda ku-salaynta.
(619) 444-5700
outreach@c4sa.org
Farriinta (Message) CSA ugu-dir shabakadda <https://www.c4sa.org/contact>
327 Van Houten Avenue, El Cajon, CA 92020

- Ilaalinta Sharciga ee Magaalada Saan Dhiyeego (City of San Diego Code Enforcement)
 Qaybta Fulinta Sharciga ee Dhismaha iyo Isticmaalka Dhulka ee Magaalada Saan Dhiyeego waxay baadhitaanka iyo fulinta sharciga ee la-xidhiidha xad-gudubka sharciga lagu-sameeyo ee la-xidhiidha isticmaalka dhulka, xeer-nidaameedyada horumarka, xeerarka dhismaha iyo guriyaynta, guriyaha la-iskaza-tagay, gaadhitaanka la-xanibay, xeer-nidaameedyada sawaxanka.
 (619) 236-5500
 1200 3rd Avenue, #8, San Diego, CA 92101
 1222 1st Avenue, 5th Floor, MS 511, San Diego, CA 92101
- Guriyayntu waa muhiim, Khayraadka Xogta ee La-siinayo Kiraystayaasha, Kireyayaasha, Mulkiilayaasha Guryaha (Housing is Key, Resources for Renters, Landlords and Homeowners) <https://housing.ca.gov/>
- Yeerka Maamulka Magaalada Saan Dhiyeego (San Diego Municipal Code)
<https://www.sandiego.gov/city-clerk/officialdocs/municipal-code>
- Isbahaysiga Guriyaynta Caddaaladda Ku-salaysan ee Goboleed ee Saan Dhiyeego (The San Diego Regional Alliance for Fair Housing) (SDRAFFH)
 SDRAFFH waa isbahaysi ay samaysteen xirfadlayaan koox ahaan iyo si wada-jir ah u shaqeeya oo dadaal ugu-jira in dhammaan dadka daggan kaawintiiga Saan Dhiyeego helaan fursad guriyaynta u siman. SDRAFFH waxay ka-koobantahay xubno ka-tirsan “fair housing community”, qaybaha dawliga ah ee goboleed, wakaaladaha fulinta sharciga iyo bixayaasha guriyaynta.
info@sdfairhousing.org
 Farriinta (Message) SDRAFF ugu-hagaaji:
<https://sdfairhousing.org/#Contacts%20Us>
- Waaxda Guriyaynta iyo Horumarinta Magaalooinka ee Maraykanka (HUD) Xuquuqda, Shuruucda, iyo Ilaalinada Kiraystayaasha: Kaalifoorniya
<https://www.hud.gov/states/california/renting/tenantrights>

Lifaaq A: Macnaynta erekada

Sharciga Ilaalinada Kiraystaha Guriga Dagganaanshaha ee Saan Dhiyeego waxaa ku-dhex-jira qeexitaanada hoos ku-qoran:

Heshiiska iibasashada: Waa heshiis uu kireeyuhu lacag ama wax kale ku-siinayo si uu markaas kiraystuhu gurigiisa ugaga baxo. Heshiiska iibashadu ma-xambaarsana heshiis lagu-xallinayo tallaabo sharci-darro ah oo aan wali la-go'aamin

Soo-bandhigidda heshiiska iibasashada: Wadahadal ama gorgortan kasta, mid afka laga sheegayo ama mid qoraal ah, oo dhex-marayte iyo kireye kaas oo ku-saabsan sidii loo-yeelan lahaa heshiis iibsasho. Soo-jeedin taas cagsi ku ah oo dhinaca kiraystaha ka-timaadda ma-soo-afjarayso wadahadalka ama gorgortanka loo-galayo soo-jeedinta heshiiska iibasashada.

Gole: Golaha Guriyaynta ee Saan Dhiyeego (wuxuu ku-dhex-xusanyahay Hagahan Ilaalinta Kiraystaha, wuxuuna u qoranyahay “SDHC.”)

Naaf: Waa qof-kasta qaba naafanimo waafaqsan sida lagu-geexay Sharciga Dawladda Kaalifoorniya qaybta 12955.3, iyo sida dib-habaynta loogu-samayn doono. Waxaa xaaladdan kamid ah karti-la'aan kasta oo dhinaca jidhka ama maskaxda ka-jirta oo ah sida ku-geexan Sharciga Dawladda qaybta 12926. Tusaalooyinka naafanimada dhinaca maskaxda waxaa kamid ah: ciladda dhinaca garaadka, caafimaad darrada orgaaniingga ah ee maskaxda, xanuunka dhinaca shucuurta iyo maskaxda, karti la'aan gaar ah oo dhinaca barashada ka-jirta taas oo xadayn wayn ku-samaynaysa hawsha way nee nolosha, laakiin kuwan kaliya kuma koobna. Tusaalooyinka dhinaca naafanimada jidhka waxaa kamid ah: cudur-kasta oo dhinaca qaab-shaqaynta qaybaha jidhka (physiological), caafimaad-darro, cilad dhinaca muuqaalka jidhka oo xumaada, qayb jidhka ka-tirsan oo la-waayo taas oo saamayn ku-yeelanaysa hawsha nololeed oo saamaynaysa mid ama in ka-badan oo ka-tirsan nidaamyada jidhka ee hoos ku-qoran: dhibaatooyinka dhinaca neerfiyada, muruqyada iyo nidaamka lafaha jidhka, qaybaha dareemayaasha ah ee jidhka, habka neefsashada, oo ay ku-jiraan qaybaha jidhka ee hadalka caawiya, wadnaha iyo xididdada dhiigga, nidaamka taranka, dheef-shiidka, qaybaha taranka, qaybta kaadida iyo kaadi-mareenka, dhiigga, limfaatiigga, maqaarka, iyo qanjidhda hoormoonada soo-saar, laakin ciladahani kuwan kaliya kuma koobna.

Xeerka Dawladda qaybta 12955.3:

https://leginfo.legislature.ca.gov/faces/codes_displaySection.xhtml?lawCode=GOV§ionNum=12955.3

Xeerka Dawladda qaybta 12926:

https://leginfo.legislature.ca.gov/faces/codes_displaySection.xhtml?lawCode=GOV§ionNum=12926

Guriga Dagganaanshaha (Dwelling Unit): Waxay leedahay macno lamid ah kan uu ka-bixiyay Xeerka Maamulka Magaalada Saan Dhiyeego 113.0103, iyo sida dib-habaynta looga-samaynayo. Marka laga-soo-bilaabo June 21, 2023, Xeerka Maamulka Magaaladu wuxuu “dwelling unit” ku-macnaynaya qol ama qolal dhismo ka-tirsan ama qayb dhismo ah oo loo-adeegsado oo loogu-talagalay ama loo-naqshadeeyay si uu hal qoys ugu dhex-noolaado, wuxuuna leeyahay kaliya hal jiko.

Xeerka Maamulka Magaalada Saan Dhiyeego qaybta 113.0103:

<https://docs.sandiego.gov/municode/MuniCodeChapter11/Ch11Art03Division01.pdf>

Kireye: Waa qof-kasta oo si toos ama isaga oo wakiil adeegsanaya xaq u leh in uu guri kireeyo, waxaana meeshan soogalaya kan ka-horeeya ee danaha kireyaha la-xidhiidha.

Kiro: Waa kiro-kasta, sii kirayn, ama heshiis, mid qoraal ah ama afka laga-yeeshay, oo ku-saabsan isticmaalka guri dagganaansho oo kiro ah.

Guriyayn aan macaash ku-salaysnayn: Waa guriyayn ku-meelgaadh ah oo ay hawlgaliso hay'ad aan macaash loo-aasasin oo muddo 24 bilood ah oo ay la-socdaan adeegyo taageerayaal ah oo shakhsiyaa iyo qoysas la-siinayo oo ay ujeeddadeedu tahay yool ku-meel-gaad ah oo xasillooni lagu-keenayo oo noqonaysa taageero loogu-soo-gudbayo guriyayn joogto ah, waxaana dhici karta in lagu-daboolo kharashka guriyaynta iyo adeegyada kale ee la-socoda ee la-siinayo ka-qaybgalayaasha barnaamijka.

Guriga dagganaanshaha ee kirada ah: Qayb-kasta oo guri ka-tirsan oo loogu-talagalay in ay dadku ku-noolaadaan, waxaana ku-jira guri-kasta oo dagganaansho ama qayb ka-tirsan seerada guriga meel-ka-meel u guura.

Aargoosi: Cabsi galin ama tallaabo-kasta oo kale oo kiraystaha loo-gaysanayo maadaama uu kiraystuhu xuquuqdiisa isticmaalay ama uu isku-dayay in uu xuquuqdiisa isticmaalo, waa xuquuq-kasta oo kamid ah kuwa lagu-caddeeyay Sharciga (Amarka) Ilaalinada Kiraystaha Guriga Dagganaanshaha.

Qaybta 8: Guriga dagganaanshaha ee kirada ee uu kiraystuhu ku-helayo caawimaad guriyayn oo ku-salaysan caawimaadda guriyaynta ee lagu-muujiyyay Qaybta 8 ee Sharciga Guriyayna ee Maraykanka ee soo-baxay 1937-kii, waxaa kale oo loogu-yeedhaa “Housing Choice Voucher Program”.

Waayeel: Qof-kasta oo ay da'diisu tahay 62-jir iyo wixii ka-wayn.

Kiraystanimo: Xuquuqda sharciyaysan ee uu kiraystuhu u leeyahay in uu si isdaba-joog ah u isticmaalo ama uu dagganaado muddo ka-badan 30 maalmood. Kiraystanimaa ma-xambaarsana kiro muddo kooban oo saddex bilood ah am aka-yar, oo ay ku-jiraan dheerayn-kasta ama dib-u-cusboonaysiin kasto oo kiro oo muddo kooban oo saddex gilood ah am aka-yar.

Kirayste: Kirayste, ka-sii-kirayste ama qof-kasta oo kale oo dabiici ah oo xaq u leh in uu kiraysto guri-kasta oo dagganaansho oo kiro ah.

Lifaaq B: Xogta Isha Dakhliga

- **Waaxda Shaqaalaynta iyo Guriyaynta Caddaaladda ah ee Kaalifoorniya (CA Department of Fair Employment & Housing) – Isha Dakhliga Su'aalaha Soo-noqnoqda ee La-soo-jeediyo**
https://calcivilrights.ca.gov/wp-content/uploads/sites/32/2020/02/SourceofIncomeFAQ_ENG.pdf
- **Sharciga Magaalada Saan Dhiyeego ee Mamnuucaya Takooridda Ku-salaysan Isha Dakhliga ee Kiraystaha**
<https://docs.sandiego.gov/municode/MuniCodeChapter09/Ch09Art08Division08.pdf>
- **Warsidaha Xogta Isha Dakhliga ee Ururka Gargaarka Shariyeed ee Saan Dhiyeego (Legal Aid Society of San Diego Source-of-Income Informational Brochure)**
English: https://www.lassd.org/wp-content/uploads/2022/07/Source-of-income-brochure_final.pdf
Spanish: https://www.lassd.org/wp-content/uploads/2022/07/Source-of-income-brochure_final_-SPA.pdf
- **Bogga Shabakadda ee Ururka Gargaarka Sharciga ee Takooridda Guriyaynta ee Saan Dhiyeego**
<https://www.lassd.org/housing-discrimination/>

Lifaaq C: Xogta Guriyaynta Caddaalada Ku-salaysan

- **Sharciga Dadka Maraykanka ee Naafanimada Qaba (Americans with Disabilities Act) (ADA)**
<https://www.ada.gov/index.html>
<https://www.ada.gov/resources/service-animals-faqs/>
- **Waaxda Xuquuqaha Rayadka ee Kaalifoorniya (California Civil Rights Department) – Takooridda Guriyaynta**
<https://calcivilrights.ca.gov/housing/>
- **Xarunta Ururka Taageerada Bulshada ee Guriyaynta Caddaaladda Ku-salaysan ee Saan Dhiyeego (Legal Aid Society of San Diego Fair Housing Center)**
<https://www.lassd.org/housing-discrimination/>
- **Isbahaysiga Guriyaynta Caddaaladda Ku-salaysan ee Goboleed ee Saan Dhiyeego (San Diego Regional Alliance for Fair Housing) (SDRAFFH)**
<https://sdfairhousing.org/#Resources>
- **Waxaada Guriyaynta iyo Horumarinta Magaalooinka ee Maraykanka, Shabakadda iyo Buugga Fursadda Siman ee Guriyaynta Caddaaladda ah (U.S. Department of Housing and Urban Development Fair Housing Equal Opportunity Website and Booklet)**
https://www.hud.gov/program_offices/fair_housing_equal_opp/online-complaint
- **Waaxda Guriyaynta iyo Horumarinta Magaalooinka ee Maraykanka iyo Shuruuca La-Xidhiidha (U.S. Department of Housing and Urban Development Fair Housing and Related Laws)**
https://www.hud.gov/program_offices/fair_housing_equal_opp/fair_housing_and_related_law